

Sida loo isticmaalo daawada Orgalutran®

Cillada ilmo la'aanta ee xagga alle ka timaadda (ofrivillig barnlöshet) waa dhibaato ay wada qabaan in kabadan nus milyan dad ah oo ku nool waddanka Iswiidhan. Dad badan ayaa doonaya inay ilmo dhalaan isla markaana arrintaan maara loo waayo, ayaa taasi noqotaa mid wax baabi'inaysa. Iyadoo kaalmo laga helayo tikniyoolajiyadda casriga ah iyo daawooyin cusub, fursaddii macquulka ahayd ayaa suurtagal u ah maanta dad badan oo xaasas ah in laga caawiyo inay carruur yeeshaan.

Daawada Puregon™ oo ay bixiso Organon waa adke ku saleysan waxa loo yaqaan hormoon kicinta FSH (follicle-stimulating hormone) taas oo loo isticmaalo qaabab xaddidan oo lagu kicinayo kobcinta ugxaanta. Daawada Orgalutran waxay ka ilaalisaa dhicisowga ilmuhu inuu sii daawo hoormoonka, LH (lu-teiniseringshormon).

Tafaasiisha xaashidaan warsidka ah isticmaalkeeda waxa loola jeedaa inay muujiso sida aad u isticmaali kareysid daawada Orgalutran. Tafaasiil taa lamid ah ayaa lo heli karaa isla daawada Puregon.

Maxay tahay daawada Orgalutran?

Daawada Orgalutran waa GnRH antagonist. Daawada Orgalutran waxay ku timaaddaa iyadoo diyaar ah oo isku qasan kuna jirta siliinge. Hase yeeshee si fudud ayaa loo qaadan karaa. Daawada Orgalutran waxaa loo qaataa iyadoo lala qaadanayo daawada kale ee Puregon isla markaana waxaa lagu heli karaa xirmooyin ahaan ka kooban mid ama shan siliige iyagoo ah.

Sida daawada Orgalutran loo isticmaalo?


1. Daawada Orgalutran waxaa la isku mudaa maalintii hal mar, qiyaastii waqti isku mid ah.
2. Dhakhtarkaaga ayaa go'aamin doona maalinta aad bilaabaysid isticmaalka daawada Orgalutran.
3. Daawada Orgalutran waxaa lagu mudaa maqaarka gudhiisa oo ah xuddunta hoosteeda. Goobaha layska durayaa waa inay kala geddinsaadaan maalin kasta. U isticmaal goobo kala geddisan daawada Puregon iyo tan Orgalutran.
4. Waxaad macluumaad ka heli doontaa dhakhtarkaaga ama dhakhtarkaaga arrimaha dhalnada wixii ku saabsan waqtigii ugu dambeeyay ee aad qaadatay duritaanka daawada Orgalutran.

Sida ayaa loo kaydiyaa daawada Orgalutran ?


Orgalutran waa daawo fudud oo xasaasi ah isla markaana waa in lagu kaydiyaa baakadka ay ku jirto lana dhigaa qol heerkulkisu fiican yahay. Hubso in aad ku kaydisid meel aan carruurto gaari karin.

Wixii macluumaad ah oo ku saabsan xajmiga isticmaal ee daawada (Orgalutran) iyo xaaladaha waxtarkeeda, ka akhriso xaashida warsidka ah ee ku lifaaqan xirmada daawada.


1. Soo bixiso baakadka ay ku jirto daawada Orgalutran. Had iyo goor iska hubi milanka kahor intaanad isticmaalin. Milanku waa inuu ka madax bannaan yahay wax qurub qurub ah.



2. Daawada Orgalutran waa in laysaga duraa maqaarka hoostiisa. Goobta ugu waanaagsan ee laysaga mudaa waa maqaarka ka hooseeya xuddunta, tartiib-tartiib midig ama bidix. Kala geddi goobta duritaanka maalinba maalin. Wax lagama maarmaan ahna ma ahan inaad jeermis tirtid goobta duritaanka.



3. Kor u qaad meesha aad duraysid adigoo maqaarka ku tuujinaya suulka iyo farta hore dhexdooda. U qabo siliingaha sidii qalin oo kale isla markaana ku riix irbadda oo dhan si toos ah oo miisaaman oo lamid ah habkii kalkaalisadaadu kuu tustay adiga. Bannee siliingaha adoo si tartiib ah u wada isla markaana ku cadaadinaya baatoonka lagu suujinayo. Markaa kadibna, ka siib irbadda meesha isla markaana tirtir oo qallaji goobta durniinka.



Orgalutran®
ganirelix
Dareeraha duritaanka ah, milanka 0,25mg / 0,5 ml